Xuquuqahaaga

Markay tahay macluumaadkaaga caafimaad, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah. Qaybtani waxay sharraxaysaa xuquuqdaada iyo qaar ka mid ah mas'uuliyadaha naga saaran inaan kaa caawino.

Hel koobi elektiroonig ama warqad ah diiwaankaaga caafimaad

- Waxad weydiisan kartaa inaad aragto ama hesho koobi elektiroonig ama warqad ah diiwaankaaga caafimaad iyo macluumaadka kale ee caafimaad ee aan kaa hayno. Na waydii sida loo sameeyo tan.
- Waxaan ku siin doonnaa koobiga ama soo koobista macluumaadkaaga caafimaad, badiyaa 30 maalmood gudahood laga bilaabo codsigaaga. Waxaan kugu soo dallaci karnaa kharash macquul ah, kharash ku saleysan ujro

Na waydii inaanu saxno diiwaanadaada

- Waxad na weydiisan kartaa inaan saxno macluumaadkaaga caafimaad ee aad u maleynaysid inuu khaldan yahay ama aan dhammaystirnayn. Na waydii sida loo sameeyo tan.
- Waxaan dhihi karnaa "maya" codsigaaga, laakiin waxaan kuu sheegi doonaa sababta oo qoraal ah 60 maalmood gudahood.

Codso wada xiriir qarsoodi ah

- Waxaad na weydiisan kartaa inaan kuula soo xiriirno si khaas ah (tusaale ahaan, taleefanka guriga ama xafiiska) ama inaan kuugu soo dirno boos cinwaan kale.
- Waxaan oran doonnaa "haa" dhammaan codsiyada macquulka ah.

Na weydii in aan xadidno waxa aan isticmaalno ama aan wadaagno

- Waxaad na weydiisan kartaa inaanaan u isticmaalin ama wadaagin macluumaadka caafimaad qaarkood daaweyn, lacag bixin, ama howlaheena.
- Uma baahnin inaan oggolaanno dalabkaaga, waxaana oran karnaa "maya" haddii ay saameyn ku yeelanayso daryeelkaaga.
- I Haddii aad ka bixiso kharashka adeegga ama shay daryeel caafimaad oo jeebkaaga si buuxda, waxaad na weydiisan kartaa inaan la wadaagin macluumaadkaas ulajeeddada lacag bixinta ama howlaheena shirkada caymiskaaga caafimaadka.
- Waxaan dhihi doonnaa "haa" haddii uusan sharci u baahnayn in la wadaago macluumaadkaas.

Soo hel liistada kuwa aan la wadaagnay macluumaadka

- Waxaad codsan kartaa liiska (xisaabinta) waqtiyada aan la wadaageynay macluumaadkaaga caafimaad lix sano kahor taariikhda aad codsatid, cidda aan la wadaagnay iyo sababta.

Hel koobi ogeysiiskan asturan

- Waxad codsan kartaa koobi warqad ah oo ogeysiiskan ah wakhti kasta, xiitaa haddii aad ogolaatay inaad hesho ogeysiiska elektaroonig ahaan. Waxaan ku siin doonaa koobi warqad ah isla markaaba.

Xulo qof kuu matala

- Haddii aad qof siisay awood qareen caafimaad ama haddii qof uu yahay ilaaliyahaaga sharciga ah, qofkaasi wuxuu ku dhaqmi karaa xuquuqahaaga wuxuuna sameyn karaa xulashooyinka ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad.
- Waxaan hubin doonnaa inuu qofku leeyahay awoodan oo uu kuu matali karo kahor intaanaan qaadin wax talaabo ah.

Mas'uuliyaadkeena

- Sharciga ayaa nooga baahan in aan dhawrno asturnaanta iyo badbaadada macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyay.
- Waxaan kugu soo wargalin doonnaa si dhakhso ah haddii la jebiyo oo laga yaabo inay wax u dhimayso asturnaanta ama amniga macluumaadkaaga.
- Waa inaan raacnaa waajibaadka iyo dhaqamada asturnaanta ee lagu sharxay ogeysiiskan oo aan ku siino koobi ah.
- Ma isticmaali doonno ama wadaagi doonno macluumaadkaaga aan ahayn sida lagu sharxay halkan haddii aad noo sheegto inaan awood u leheyn qoraal ahaan. Haddii aad noo sheegto inaan awoodno, waad beddeli kartaa maskaxdaada wakhti kasta.

Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html.

Oktoobar 24keeda, 2013

Isbedelada lagu sameeyo Shuruudaha Ogeysiiskan
Waanu beddeli karnaa shuruudaha ogeysiiskaan, isbeddeladuna waxay quseyn doonaan dhammaan macluumaadka aan kaa hayno adiga. Ogaysiiska cusub ayaa la heli doonaa markii la codsado, xafiiskayaga, iyo boggeena internetka.
Khadka Rayi-celinta Bukaanka: (802) 540-8253

Ogeysiiskan Dhaqangalka Asturnaanta wuxuu khuseeyaa dhammaan goobaha Community Health Centers of Burlington, Inc.

617 Riverside Avenue
Burlington, VT 05401
www.chcb.org

Rev 08/2019

Ogeysiiska Dhaqangalka Asturnaanta

Macluumaadkaaga. Xuquuqdaada Masuuliyaadkeena.

Ogeysiiskaani wuxuu sharxayaa sida macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan loo adeegsan karo loona kashifi karo iyo sida aad u heli karto macluumaadkan.
Fadlan si taxaddar leh u fiiri.

Cabasho soo gudbiso haddii aad dareensan tahay in xuquuqdaada lagu xadgudbay

- Waad caban kartaa hadaad dareento inaan ku xad gudbay xuquuqahaaga adigoo nala soo xiriiraya adigoo adeegsanaya macluumaadka bogga 1.
- Waxaad u fayl garayn kartaa cabasho Waaxda Caafimaadka iyo Xafiiska Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka ee Xuquuqda Aadanaha adigoo warqad u diraya 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, adoo wacaya 1-877-696-6775, ama booqanaya www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.
- Kama aargudan doonono cabashada aad gudbisay awgeed.

Xulashooyinkaaga

Macluumaadka caafimaadka qaarkood, waad noo sheegi kartaa xulashooyinkaaga ku saabsan waxa aan wadaagno. Haddii aad leedahay doorbidaad cad oo ku saabsan sida aan macluumaadkaaga ula wadaagno xaaladaha hoos ku qeexan, nala hadal. Noo sheeg waxaad rabtid inaan sameyno, oo waxaan raaci doonnaa tilmaamahaaga.

Xaaladahan, waxaad leedahay labadaba xaquuq iyo xulasho inaad noo sheegto

- La wadaag macluumaadka qoyskaaga, saaxiibbada kuu dhow, ama kuwa kale ee ku lug leh daryeelkaaga
- La wadaag macluumaadka xaalada gurmadka musiibada
- Kuula soo xiriiri donaa dadaalada lacag-aruurinta

Xaaladahan oo kale weligeen lama wadaagi doonno macluumaadkaaga ilaa aad na siiso oggolaansho

- Ujeedooyin suuqgeyn
- Iibinta macluumaadkaaga
- Inta badan wadaagida qoraallada cilmu-nafsiga

Xaalada lacag uruurintan

- Waxaan kula soo xiriiri karnaa dadaalada aruurinta, laakiin waad noo sheegi kartaa inaanan mar dambe kula soo xiriirin.

Isticmaalkeena iyo Shaacinta

Sidee ayaanu caadi ahaan u adeegsan karnaa ama u wadaageynaa macluumaadkaaga caafimaad? Caadi ahaan waxaan u isticmaalnaa ama u wadaageynaa macluumaadkaaga caafimaad siyaabahan soosocda.

Daweyntaada

- Waxaan u isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaad oo aan la wadaagi karnaa xirfadleyaasha kale ee ku dawaynaya.

Caawinta arrimaha caafimaadka iyo amniga

Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan xaaladaha qaarkood sida:

- Kahortagga cudurka
- Caawinta dibu-soo-celinta badeecada
- Soo sheegista falcelinnada xun ee daawooyinka
- Soo sheegista xadgudub la tuhunsan yahay, dayacaad, ama rabshad guri
- Kahortaga ama yareynta halista qatar ku ah qof caafimaadka ama amaankiisa

Hawsha ururkeena

- Waxaan u isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad si aan u socodsiino howlaheena, kor u qaadista daryeelkaaga, oo aan kula soo xiriirno markii loo baahdo.

Tusaale: ***Waxaan u isticmaalnaa macluumaadkaaga caafimaad adiga kugu saabsan si aan u maamulno daaweyntaada iyo adeegyadaada.***

Ku dallac adeegyadaada

- Waxaan u isticmaali karnaa oo u wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad si aan u dallacno ugana helno lacag bixinta qorshayaasha caafimaadka ama hay'adaha kale.

Tusaale: Waxaan macluumaadkaaga kugu siineynaa qorshahaaga caymiska caafimaadka sidaa darteed waxay ku bixin doontaa adeegyadaaga.

Sidee kale ayaan u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad? Waxaa naloo oggol yahay ama loo baahan yahay inaanu macluumaadkaaga u wadaagno siyaabo kale - badiyaa siyaabo ka qaybqaata wanaagga dadweynaha, sida caafimaadka bulshada iyo cilmibaarista. Waa inaan la kulannaa shuruudo badan oo sharciga ah kahor intaanan la wadaagin macluumaadkaaga ujeeddooyinkan. Wixii macluumaad dheeraad ah eeg: **www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html.**

Samee cilmibaaris

- Waxaan u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga cilmi-baaris caafimaad.

U hogaansan sharciga

- Waxaan la wadaagi doonnaa macluumaadka adiga kugu saabsan haddii sharciyada gobolka ama federaalka ay u baahan yihiin, oo ay kujirto Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha haddii ay rabto inay aragto inaan fulineyno sharciga qarsoodiga ee federaalka.

Ka jawaab codsiyada ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada

- Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan ururrada hela xubnaha.

La shaqee baaraha caafimaadka

- Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka baaraha, baaraha caafimaadka..

Wax ka qabashada magdhowga shaqaalaha, iyo codsiyada kale ee dowladda

Waxaan isticmaali karnaa ama wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan:

- Codsiyada magdhowga shaqaalaha
- Hay'adaha kormeerka caafimaadka la xiriira howlaha sharciga uu fasaxay
- Hawlo gaar ah oo dawladeed sida militariga, amniga qaranka, iyo adeegyada ilaalinta madaxweynaha

Ka jawaab dacwadaha iyo talaabooyinka sharciga ah

- Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan iyada oo laga jawaabayo amar maxkamadeed ama amar maamul, ama iyada oo looga jawaabayo amar maxkamadeed.

Rikoodhada Daweynta Xadgudubka daroogada iyo khamriga: Xarumaha Caafimaadka Blshada ee Burlington, Inc. ("CHCB") ma sii deyn doonaan wax dukumeenti ah oo ah daaweynta daroogada ama khamriga la isticmaalo ee lagu ilaaliyo 42 CFR Qeybta 2 ("Qeybta 2") iyadoon amar qoraal ah laga helin bukaanka ama wakiilkiisa ama wakiilkeeda sharciga ah ee buuxiya shuruudaha sharciga ee shaac ka qaadista. Mar alla markii ay suurta gasho, CHCB waxay u wareegi doontaa 'quater-subpoena's' wixii macluumaad ah ee hoos yimaad Qeybta 2 sida uu farayo qaanuunku.